

Wareegto kasoo baxday Wasaarada Carruurta, Dhalinyarada, Qoyska, Sinnaanta, Qaxootiga iyo Is dhexgalka ee Fursadaha Xaquuqda Deganaanshaha - Lifaafa 3 Tixraaca qodobka 1.6 ee tilmaamaha arjiga

---

Suurtagalnimada ee tusaalooyinka lagu sameynayo qirashada

iyadoo lagu saleynayo qoraalada arjiga ku meel gaarka ah ee qeybta 10 (1) jumlada 1 lambarka 1 ee Xeerka Qaranka (StAG)

Ballanqaadka aaminaada nidaamka dastuuriga ah ee dimoqraadiyada xorta ah:

„1. Waxaa iga go'an nidaamka aasaasiga ah ee dimoqraadiyada xorta ah ee Dastuurka Jamhuuriyada

*Federaalka Jarmalka. Gaar ahaan, waan qirsannahay:*

- a) *xaqa ay dadka ugu dhaqmaan awooda gobolka ee doorashooyinka iyo codadka iyo in ay soo mariyaan hay'ado gaar ah oo sharci dejineed, fulineed iyo garsoor, iyo in ay doortaan wakiillada shacabka oo caalami ahaan ah, toos ah, xor ah, simman oo qarsoodi ah,*
- b) *ku dhaqanka shuruucda nidaamka dastuuriga ah iyo ku dhaqanka awooda fulinta iyo maamulka cadaalada sharciga iyo cadaalada,*
- c) *xaquuqda lagu aasaasayo oo loogu dhaqmayo mucaaradnimada baarlamaanka,*
- d) *xil ka qaadista xukuumada iyo la xisaabtankeeda wakiillada shacabka,*
- e) *madax banaanida maxkamadaha,*
- f) *ka reebida sharciga xooga ah ama awooda aan la qiyaasi karin,*
- g) *xaquuqul insaanka sida loogu qeexay Dastuurka, iyo*
- h) *in falka daba socda Naceybka yuhuuda, cunsuriyada, ajaanib naceybka ama ujeedooyin kale ee bini'aadannimada leh sharafta iyo sinnaanta aadanaha oo dhan ee uu dammaanad qaadayo Sharciga Aasaasiga ah oo lid ku ah qirashada.*

2. Waxaan cadeynayaa in aanan ku daba jirin ama aan taageersaneyn ama aanan dabagalin ama aan taageerin wax dadaalo oo

- a) *ku wajahan nidaamka aasaasiga ah ee dimoqraadiyada xorta ah, jiritaanka ama amniga Federaalka ama Dhulka, ama*
- b) *u haysto ujeedooyinkooda sida faragelin sharci daro ah iyo habdhaqanka rasmiga ah ee hay'adaha*

*dastuuriga ah ee Federaalka ama Dhulka ama xubnahooda, ama*

c) *qatar geliya danaha shisheeye ee Jamhuuriyada Federaalka Jarmalka iyada oo la adeegsanayo rabshado ama ficillo u diyaarsan halkaas, ama*

d) *u haysto sida ujeedooyinkooda Yuhuud naceybka ah, cunsuriyada, ajaanib naceybka ama fal kaloo bini'aadantinimada ah."*